Australian Government

Australian Financial Security Authority

HESHIISKA ADEEGA MACAAMIILKA

Sebteembar 2015

Heshiiskaan wuxuu sharaxayaa hay'adeena, ujeedada iyo hamilooyinka iyo balanta adeega aan u sameyno macamiishena.

Cida aan nahay

Maamulka Amniga Dhaqaalaha Australia (AFSA) waa hay'ada fullinta ee feelasha Xeer ilaaliyaha Guud. Waxaan maamulnaa codsiga wax beelida iyo sharciyada amniga hantida gaarka ah ilaa gaarsiinta waxbeelida tayo sareyso iyo wakiilka, xeerarka iyo fullinta, adeegyada aminga hantida gaarka ah.

Aragtideena

AFSA waa hay'ad firfircoon ee fududeysa natiijooyinka la hagaajiyay iyo natiijooyinka dhaqaalaha simman ee macaamiisha, ganacsiga iyo bulshada ilaa ay wanaagsanaato gaarsiinta adeega.

Ujeedadeena

Ujeedadeena waa siinta natiijooyin hormarsan iyo natiijooyin dhaqaale ee ku haboon macaamiisha, ganacsiga iyo bulshada ilaa codsiga wax beelida iyo sharciyada amniga hantida gaarka ah, xeerarka waxbeelida gaarka ah iyo dhaqtarka, iyo adeegyada wakiilka.

Himiladeena

Waxaan garsiinaa ujeedadeena ilaa himiladeena.

Hamilada 1: Kalsoonida la hormariyay ee waxbeelida gaarka ah iyo barnaamijyada caymiska ee aan maamulno.

Hamilada 2: Qiyamka la gaarsiiyay si loo taageero natiijooyin simman oo dhaqaalaha ee macaamiisheena.

Hamilada 3: Adeeyo wax ku ool ah ee si joogta ah u wanaajiyo is dhaxgalkaaga inaga ah.

Hamilada 4: Warbiixn tayo leh ee lagu xoojinayo macaamiisha iyo daneeyayaasha si loo ogeysiiyo go'aamada.

Adeegyadeena

Adeegyada waxbeelida iyo wakiilka

Shaqaalaheena waxbeelida dhameystiran iyo adeegyada wakiilka waxaa ku jira bixinta warbixin wax ku ool ah ee ku saabsan dooqyadeena lagula xaajoonaya deynta aan la maamuli karin iyo matalaada wakiilka ee maamulada waxbeelida gaarka ah.

Xeerarka iyo fullinta

Doorkeena ugu muhiimsan oo ay ku jiraan nidaaminta xirfadlayaasha waxbeelida gaarka ah iyo baaritaanka lagu eedeeyay Xeerka Waxbeelida iyo Xeerka Amniga Hantida Gaarka ah (PPS Act) dambiyada iyo meesha ku haboon ee loo gudbinaya xeer ilaalin.

Amniga hantida gaarka ah

Qibradeena waxay noo ogolaaneysaa in aan gaarsiino adeegyo kala duwan oo ay ku jiraan ka jawaabida codsiyada lagu sameeyay sida waafaqsan Xeerka PPS iyo siinta qeybta warbixita gaarka ah ee lagu caawinayo isticmaalayasha si ay si wax ku ool ah u isticmaalaan Diiwaanka Amniga Hantida Gaarka ah (PPSR).

Tayada gaar ah iyo qiyaasta wax qabadka tayeysan waxaa la hormariyay si loo hubiyo in aan gaarnay hamiladeena. Warbixinta sharaxan ee ku saabsan adeegyadeena iyo qiyaasta waxqabadka waxaa laga heli karaa Qorshaheena Shirkada ee websaydka AFSA websaydka www.afsa.gov.au.

Balanqaadyadeena adeega

Balanqaadyadeena adeega waxay taageertaa wanaaga gaarsiinta adeega iyo dhameystirka Qiyamka Adeegyada Bulshada Australia iyo Xeerka Anshaxa.

Waxa aad naga fillan kartid inaga:

- **Xirfadnimo**–waxaan ku gaarsiinaa adeegyadeena si cadaalad ah iyo wax ku ool ah iyo kuula dhaqanno si ixtiraam ah.
- **Ka jaawibada**–waan ku dhageysanaa, buuxinaa waqtiga lagu heshiiyay iyo si ku haboon uga jawaabno jawaabaha iyo su'aalaha. Waxaan u isticmaalnaa warbixintaan si aan u fahanno baahidaada iyo si aan u wadno hal abuur.
- **Helitaanka sahlan ee adeegyada**–waxaan ku siineynaa helitaan dhaqso ah iyo sahlan ee adeegyada ku haboon iyo shaacina sida la midka ah iyo waafaqsan warbixinta lagu caawinayo ogeysinta go'aanka.
- **Ku xisaabtanka**–waxaannahay dad la xisaabtan leh ee go'aamadeena iyo ficiladeena. Waxay ujeedadeena in aan ahaano jaal aamin u leh daneeyayaasheena iyada oo la gaarsiinayo adeegyada macaamiisha ganacsi ahaanta iyo waddo daahfurnaan ah.

AFSA waxaa ka go'an in ay gaarto iyo joogteyso heer sare ee adeega macaamiisheena. Waxaan ku dadaalnaa in aan bixino warbixin caawin leh laakin ma bixin karno talada sharciga, fasiraadaha sharciga ama fikradaha.

Sida aad nagu caawin kartid inaga

Waxaan ku dadaalnaa in aan siino adeegyo wanaagsan macaamiisheena. Si aad noo caawiso, waxaan ku qweysiisaneynaa in aad:

- la tashitid websaydyadeena dhameystiran wixii warbixin waafaqsan
- nala soo xiriirtid inaga haddii aad u baahantahay caawinta warbixinteena ama adeegyada
- jawaab sheegtid haddii adeegyadeena aysan u soconin sida aad filaneysid
- u hogaansanaatid waxbeelida iyo sharciga amniga hantida gaarka ah iyo xeerarka la xiriir
- sheegtid warbixin dhameystiran, waqtiyeysasn iyo saxan
- noo ogolaatid inaga waqti saxan ee lagu jawaabo codsiyadaada
- ula dhaqantaa shaqaalaheena ixtiraam iyo sharaf.

Jawaabta

Waxaan qiimeynaa jawaabtaada sida aynoogu caawiso in aan fahamno waaya aragnimadaada sidoo kale sida aad nagu caawineysid in aan si wanaagsan u buuxino baahidaada.

Haddii aad jeceshahay in aad jawaab bixisid ama gudbisid cabasho, waxaad sidaas ku sameyn kartaa:

- adiga oo buuxinaya foomka jawaabta onleenka ee laga helo websaydkeena
- ilaa mid kamid ah kanaalada lagu tilmaamay 'Sida naloola soo xiriiro inaga' qeybta daabacaadan.

Warbixin dheeraad ah ee la xiriirto nidaamyada cabashada AFSA ay qaabishowaxaa laga heli karaa websaydkeena.

Cabashooyinka ku saabsan xirfadlayaasha warshadaha

Haddii aad ka walaacsan tahay tallaabada ay qaadeen wakiilka waxbeelida gaarka ah, maamulaha heshiiska deynta, ama shaqaalaha kale, waa in aad aqrisaa bogga Xalinta *Cabashada ee wakiilada iyo maamulayaasha* ee websaydkeena.

Illaha kale ee dib u eegida cabashooyinka

Haddii aadan ku qanacsaneyn wadada cabashadaada loola macaamilay, waxaa laga yaabaa illo kale ee cabashadaada dib loogu eego.

Nooca su'aasha	Hay'ada	Taleefonka
Cabashada guud	Commonwealth Ombudsman	1300 362 072
Meesha aad aaminsantahay in xaquuqdaada arimaha gaarka lagu xadgudbay	Xafiiska Guddiga Warbixinta Australia	1300 363 992
Xaaladaha kale ee gaarka ah meesha sharciyada kuu ogolaado	Maamulka Maxkamada Racfaanka	1800 228 333

Dib u eegida go'aanka wakiilka iyo maamulaha

AFSA waxaa laga yaabaa in ay dib u eegto qaar kamid ah go'aamada ay sameeyeen wakiilada iyo maamulayaasha. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan nidaamkaan, fadlan aqri *Racfaan ma Qaadan karaa?* bogga websaydkeena.

Sida nalaoola soo xiriiro

Waxbeelida	Diiwaanka Amniga Hantida Gaarka ah
Websaydka: **www.afsa.gov.au**	Websaydka: **www.ppsr.gov.au**
Nala soo xiriir: **www.afsa.gov.au/contact-us**	Nala soo xiriir: **www.ppsr.gov.au/contact-us**
Taleefonka: 1300 364 785	Taleefonka: 1300 007 777 (1300 00 PPSR)
Saacadaha shaqada (AEST iyo AEDT): • Isniinta ilaa Jimcaha 8.30 a.m. ilaa 8.00 p.m. • Maalmaha fasaxa qaranka - way xirantahay	
Fadlan ka fiiri websaydkeena saacadaha xafiiska inta lagu jiro muddada Kirismaska/Sannadka Cusub	

Caawinta luuqadaha kale

Warbixinta luuqadaha aan ka aheyn Ingiriis waxaa laga heli karaa websaydkeena.

Haddii aad qabtid dhibaatooyin hadalka ah ama fahamka Ingiriiska, waxaad soo wici kartaa Adeega Turjubaanka ama Fasiraada Qaranka (TIS) ee 131 450 ee qarashka wicitaanka gudaha ah.